بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ

# GARO CADOWGAAGA

# DUULAANKA MASKAXDA

## Qeybta 2

ASMO KHALID

**2024**

Schrijver: Asmo Khalid

Coverontwerp: Asmo Khalid

ISBN: 9789403748269

### ❖ Cadowgaaga

Mala socotaa waxa maanta dunida ka socda. Xaaladda Caalamka uu ku sugan yahay. Mise aduunyo ayaa laguugu mashquuliyay. Oo waxaad ku mashquushay waxaan aakhiro iyo aduunyaba aysan dani kugu jirin. Waxaad ku mashquushay waxaan faaido u laheyn aakhiradaada iyo aduunkaaga.

Waxaa indhahaaga daboolay waxa inaga oo dhan na hor yaala. Oo ah wax yaalo badan oo inoo diidaya inaan dhaqaaqno. Kuwaas ayaa inagu ah sidii culees oo kale. Oo hore uma socon karno.
Dib ayeey noo jiitaan. Mar walbo oo is dhahno horey u soco.

Waxaan kaga mashquulnay aakhiradeena, aduunkeena, nolosheena, reerkeena, riyadeena, hankeena, hibadeena, hadafkeena maxay tahay?

Waxaas faaidada uu wato ayaan rabaa inaan ogaado. Maxay tahay waxa nolosheena aan ku iibsanay? Sheygaan wax walba inaga mashquulinaayo, laakin cidna aysan ka hari karin.

Maxaan qabanaa?
Maxaan ku qabanaa waqtigii inala siiyay?
Maxaan waqtigeena ku dhuminaa?
Maxaa ina mashquuliyay?
Maxay tahay waxaan aan shey walba u dayaceyno, inta gacanta aan ku heysano?

Maanta wax baan kuu sheegayaa. Waxaad horey u ogeyd.
Aad ogtahay. Oona ogaan doontid.
Maanta waxaan kuu sheegayaa cadowgaaga koowaad.
Cadowga ugu weyn aad leedahay.

Cadowgaaga aad adiga quudiso maalin walba. Waxa kaliya aad ka faaididna ay tahay, inuu aduunkaaga iyo aakhiradaada kaa mashquuliyo.

Waa moobeelka.

Aniga ma ihi qofka ugu horeeyo ee waxaan kaaga diga.
Cadowgaas aad leedahay qof walba ayaa horey kaaga digay.
Maxaan u dhageysan la'nahay.
Cadowgeena horaan u ogeyn. Waana ognahay. Waana ogaanay. Maxaanan uga harin moobelka?

Maxay tahay sababta aan gacmaha ugu wadano?
Waan wada ognahay mobeelkaan yar. Qof walba gacanta ugu jiro inuu yahay cadowgeena koowaad. Hadaad raacdid waxay iyaga ku faraan, ama waxay hawadaada dooneyso.

Waxaan kaloo ognahay cadowgaan aad leedahay. Inaad u leedahay awood aad kaga dhigi kartid saaxiibkaaga ugu qaalisan, oo wax walba kuu hura.

Moobeelkaan yar, ayaa dad badan noloshooda baabi'iyay.
Dad yarna noloshooda ayuu hagaajiyay.

Waan wada ognahay cadowga kaliya uu Bani Aadam ka leeyahay inuu yahay sheydaanka. Sheydaanka iyo duulka la shaqeeyo. Ha noqdo sheydaan insi ah, oo Bani Aadam ah.
Ama ku jini ah. Kuu doono ha ahaado. Kaa waa cadowgeena.
Ilaahay swt ayaa inoogu digay. Qur'anka. Axaadiista. Sunada.
Meel walba ayaa lagu sheegay.

Kani waa cadowgaaga ee cadow ka dhigo. Ka fogoow. Wuxuu ku faro ha falin. Ha raacin. Ileen asagaa naar u socda. Koox kale ayuu doonayaa uu naarta u kaxeysto.
Kaas Ilaahay swt ayaa horey inoogu sheegay. Aqoonteeda diinta Islaamka ayeey ka buuxdaa, halkaasna waad ka heli kartaa.

Laakin maanta waxaan ka hadlaayo ayaa ah, cadowgaan kale. Cadowgaan oo mar waliba inala jooga. Cadowgaan oo kaa tagin markaad sheydaanka iska naarto. Oo Ilaahay aad magan gasho. Ileen adigaa gacanta ku sida.

Cadowgaan aad quudiso habeen iyo maalin. Quudkaaga kiisa ayaad ka hor marsiisaa. Moobeelkaaga hadii uu damsan yahay, uu dabka ka dhacay.
Inta aadan adiga wax cunin. Asiga kiisa ayaad siisaa. Oo jaajarka ayaad ku hubsataa. Markaas kadib ayeey cuntada kaa dagtaa.

Adigoo aaminsan intaad wax cuneyso inuu asagane quudkiisa qaadanayo. Oo jaajarkii uu ku shaqeyn lahaa ayaad gelisay. Saad hadhow u isticmaasho. Ood halkaas kasii wadid halaagida nafsadaada.

Mobeelkaan ayaa maanta ka mid ah dhibaatooyinka ugu waa weyn ee bulshadeena ka jira. Qof walba ayaa sita. Laakin su'aasha mudan jawaabta ayaa ah. Imisa qof ayuu noloshooda hagaajiyaa? Imisa ayuu ku ciyaaraa? Imisa qof ayuu halaagaa? Imisa qof ayaa kheyr iyo wanaag ka faaida.

Nasiib xumo, jawaabteeda waad ogtahay. Waxaa badan inta uu dhibaato u geystay. Inta uu dhibaateeyay ayaa ka badan, inta ka faaiday. Maalin walba waxaa sii ziyaadeysa inta uu dhibaateeyo. Inta ka faaida ayaa iyagane sii yaraanaya.

Cadowgaan awood kale uu wato ayaa jirto. Dad badan aysan ku baraarugsaneyn. Dadkii quluubtooda ayaa lagu abuuray baahi. Baahi ah ineysan mobeelkaan la'aantiisa noolaan karin.

Moobeelkaan ayeey had iyo jeer isticmaalaan. Dadkii ayaa la awood tirayaa. Adigoo wax xasuusan kara, aadan xasuusaneynin. Shey walba meel baad ku qoreysaa.

Faaidada ugu weyn ee mobeelka laga damacsanaa ayaa ah, dadka inuu awood tiro. Dadkii moobeelkaan sameeyay iyaga un ayaa ka faaida. Ileen lacag badan ayeey ka helaan.

Khasaaraha ugu weyn oo dadka u geysto ayaa ah, inuu umadii howl gab ka dhigay. Dad aan shaqeysanin. Oo fikirin. Oo waxba isku dayin.

Iyagoo cimrigooda ku dhameeya, moobeel un.
Dhalinyarteena maanta fiiri. Xaaladooda waan u jeednaa.
Iyaga kaliya dhibkaan ma heysto. Dunida oo dhan ayaa la yaaban dadkooda. Ileen dhibtaan ayeey ka taagan tahay aduunka oo dhan.
Dadkii ayaa laga wada dhigay afar indhood.

❖

Dadkaan qorshahooda ayaa ahaa iney helaan dad ay adoonsadaan. Dad aan fikirin. Dad wax walba loo sheego iska aamina. Dad iyaga ku xiran ayeey doonayeen. Taageero ayeey u baahan yihiin.

Qorshahooda dunida lagu maamuli lahaa wax bey u baahnaadeen ee dunida oo dhan 1 mar ku gaarsiiyaan.

Markaasay sameysteen technology iyo science. Dadkii ayeey u sameeyeen aalado badan ay ku mashquulayaan.

Aaladahaas oo isla markaana ka caawinaya dadkii qorshahaan sameystay, inay maskaxda shacabkooda ku maamulaan.

Moobeelka. Umadii ayaa loo sameeyay moobeelo iyo kuwo kale oo badan. Faaidadooda ayaa aad iyo aad u badan. Laakin sharta iyo xumaanta ku duugan ayaa kasii badan. Dadka isticmaala aaladahooda ayeey ku adag tahay say iskaga leexiyaan ay uga fogaadaan xumaanta halkaa taala.

Ileen ma ahan wax laga fogaan karo. Meel walba iyagaa kusoo doonanaya. Adigoo gurigaaga iska jooga ayeey xumaantii kusoo doonaneysaa. Zaman sidaas ah ayaan ku nool nahay.

Mobeelka ayaa loo isticmaalay dadka. Say iyaga qorshahooda ugu fulistaan. Umadiina ay maskaxda uga qabsadaan.

Dadkii ayaa la siiyay xornimo hadal ah. Waxaad doontid ayaad sheegi kartaa ayaa lagu dhahay. Cidna maku qabsaneyso.

Markaasay umada oo dhan meel walba ka hadashaa. Mid fikiraya ayaa la waayay. Afka furta ayaa la dhahay. Markaasuu xididka hadalka uu go’ay. Wax celiyo ayaa la waayay.
Waa sidii raadiyaha oo kale. Raadiyo oon laheyn meel laga damiyo. Hebeen iyo maalin ayeey iska hadlaan, bilaa xuduud.

Arintaan ayaa keentay khilaaf badan. Umadihii ayaa iska soo horjeystay. Cunsuriyaadii, dagaalada, naceybka iyo kuwo kale oo badan ayaa bulshada kusoo ziyaaday.

Aaladahaan ayaa sababay inay dadka is nacaan, ay kala haraan. Dadkii ayaa lagu kala geynayaa. Waxaad arkeysaa qoys wax cunaya. Mid walba wuxuu gacanta ku sitaa moobeelkiisa. Cid isla hadleysa ayaan jirin.

Xiriirkii familka. Saaxiibtinimadii. Wada qosolkii. Xuduudii. Is barashadii. Dadkii oo is celiya, oo yac is dhaha. Ayaa faraha ka baxday.

Cid iska war heyso ayaaba jirin. Nin walba moobeelkiisa ayuu saaxiib la yahay.

Masiibadaas yar gacmaha aan ku wadano ayaa sababtay dadkii oo dhan inay kali noqdaan.

Waa sidii ay iyaga rabeen. Ileen gacmo wada jir beey wax ku gooyaan. Dad isla jira. Oo wada jooga, waxba maka qaadi kartid. Laakin markaad isku dirtid dadkaan, ay kala fogaadaan. Mid walba aya la saaxiibaya moobeelka.

Moobeelka lala saaxiibo ayaa keeneysa qofka inuu kaligiisa ahaado. Qofkii ayaa nacaya dadka. Moobeelkaas ayuu ka helayaa.

Ileen dad muxuu uga baahan yahay? Haduu mobeelkaas ka helayo wax walba dunida yaalo.

- Dadkii ayaa kali kali laga dhigayaa.
- Dadkii ayaa la saaxiibaayo moobeelka.
- Moobeelka dad baa sameystay. Wixii ay doonaan ayeey soo saarayaan.
- Dakaan ayaa media is kaleh.
- Moobeelka wax walbo aa ka aragtid, waa waxay doonayaan inaad aamintid.
- Dadka maskaxdooda ayeey sidaas kaga qabsnayaan. Iyagoon kuu imaanin.
- Ileen waan wada ognahay. Wixii indhaha ka bata, inuu qalbiga dago. Maskaxdane ay u fikirto wixii lagu shubo un.
- Waxay maskaxdaada ku shubayaan ayaa ah. Wax walba aad ka aragtid, ka sameysid ama aad ka fiirsatid moobeelkaaga.
- Iyaga ayaa sameystay media. Dantooda ayeey u isticmaalayaan. Haba noqotee dad badan inay sidaas ku nolol tiraan.

Waad u jeedaa. Waa musalsal socda. Isla sidii un waaye. Qorshahooda ayeey fulisanayaan. Meel ay kaasoo galaan ma waayaan dadkaan.

Maskaxdaada ayeey ka buuxinayaan, waxaan aakhiro iyo aduunba ku anfaceynin. Dadkii ayaa la waalayaa.

Waxa Dunida Ka Socdo maanta waan u jeednaa. Aduunka aad ku nooshahay. Sidaad u maleysid ma ahan.

Waxaad u jeedid ayaa ah un, aduunyada ay rabaan inaad adiga aragtid. Miday qarinayaan ayaa kasii daran, taas ayaana ka halis badan.

Taan aqoonteeda u baahan nahay ayaa midaas ah. Aqoonta ay dunida ku maamulaan, iyo sababta ku kaliftay dadkaan inay maamulaan.
Maxay ka faaidayaan hadii ay maamulaan?

Muslimiinta waa dad mar walbo wax raad raaco. Ogaado Meesha ay ka timid waxaan. Inta aanan wax iska raacin, waa inaa marka hore saarnaa miizaanka Qur'aanka iyo kan sunada.

Si aan u ogaano iney diinteena ogoshahay sheygaan iyo in kale.
Waa inaan ogaanaa. Halka ay waxaan ka imaadeen iyo qorshaha laga damacsan yahay.

Cuntooyinka aan cunno.
Mobeelada an isticmaalno.
Wax walbo halka ay ka imaadeen iyo waxa laga damacsan yahay waa inaan ogaanaa.
Nin aduunyo joogoow. Maxay aragti kuu laaban tahay.

Wax walbo aan haysano, samayno ama aan isticmaalno. Waa inaa ogaanaa marka hore, halista ay dadka, aduunka iyo xayawaanada u geysan karto.

Waa shey la hubo. Wax walba aad u jeedid oo faaiido leh. Waxaa jiro halis kale oo ka hooseysa. Halistaas ayeey mar walba kaa qarinayaan.

Godkee iyaga inoo qodeen. Waa inaan faagnaa.

❖

Maanta waxa dunida ka jiro ayaa ah iney wax walba hal hal usoo badanayaan. Adigoon ogeyn, oona fahamsaneyn waxa ka dhacaayo dunida maanta.

Is badalkaas tirada badan, ee maalin walbo dhaca, ayaan la qabsanay. Caado ayeey inoo noqotay. Ilaa xaalo aan gaarnay, ineysan cidna is weydiinin sirta iyo qorshaha ka dambeysa waxa uu yahay.
Is badalkaan tirada badan muxuu yahay?
Qof arinkaa is weydiiya ayaa jirin.
Waayo waxaan la qabsanay is badalkii. Dadkii ayaa arinkaan caado ka dhigtay.

Shey walba ayaa is badalo. Maalin walba wax cusub ayaa soo baxa. Wax kale ayaa laga tagaa. Maalin walba wax baa lagu kacaa. Wax baa laga tagaa.

Dadkii ayaa la qabsaday is badalka. Ma jirto qof is weydiineysa. Wax walbo oo cusub, caadi ayeey inala noqotay.

Qof walba ayaa is dhaha waxaan ku nool nahay zaman ay dunida horumareyso. Ilbaxnimada ayaa sii ziyaadeysa. Dadkii ayaa is badalka la qabsanaya.
Anaga maanan fahamsaneyn, laakin qorshe ka weyn ayaa ku hoos jiray.

Markii ay wax walba is badalaan. Dadkii na ay la qabsadaan is badalkaas tirada badan. Waxa dhaca ayaa ah, dadka ineysan la yaabin hadii uu is badal dhaco. Wax walba oo cusub, caadi ayeey u arkaan.

Ileen dadkii ayaa aaminay, inaan ku jirno xili ay dunida horumareyso. Mar walba uu wax cusub soo baxo, ama uu shey is badalo. Dadkii ayaa arintas la yaabeynin. Cid ka hadleysa ayaan jirin. Ileen is badalka ayaa inoo noqday caado.

Nasiib xumada uu arinkaan watay ayaa ah. In xili walba uu soo baxo wax yaalo badan oo dhaqan xumada faafinaya. Dadkii ayaa dhaqan xumo lagu faafinayaa.

Dadkii ayaa la wada qabsaday is badalka. Dadkii ayaa mar walba is dhaha ''tani waa caadi, waa shey mar lagu kacaayo, marna laga dagaayo, oo ma ahan waxaan la yaabno.'' Dadkii ayaan u arkin xumaanii xumaan.

Xumaantii ayaa caado inala noqotay. Xumaantii ayaan aaminnay inay ka mid tahay is badalka dunida ka dhacaayo.

Halista ay arinkaan wadato ayaa ah. Mar walba oo wax xun soo baxo, iney san jirin cid ka hadasha. Qof walba ayaa ka aamusa. Ileen dadka ayaa mar walba fisha inay wax is badalaan. Hadii uu xiligaan noqdo waxa cusub, shey dhaqan xumo wata. Maka hadlayaan.

Ileen maskaxdeenii ayaa laga dhaadhiciyay is badalka inuu shey wanaagsan yahay. Uu kheyr wato. Wax walba oo xunna, xili bey ku eg yihiin. Oo waa laga ilbaxayaa. Dadkii ayaa arintaan isku dhaho.

Laakin mid ogoow. Waana ogtahay. Waana u jeedaa. Hortaada ayeey ka dhacayaan. Hadii ay mar xumaan soo baxdo, marna malaga ilbaxo. Xumaantii ayaa u yeelata awood ay dhaqankeena kaga mid noqoto.

Sheygii xumaa ayaa caado inala noqonaayo. Meel walba ayaan ku arkeynaa. Qof walba ayaa sameynaayo, markaas kadib indhaheena markay caado la noqoto. Xumaantii ayaa noqonin mid lala yaabo. La yaabkii ayaa meesha ka tagaya.

Dadkii ayaa la yaabeynin xumaanta. Xumaan walba ee dhacda, waxay is dhahayaan. ''waa caadi, is badalka ayuu ka mid yahay''.

Laakin waxaan u jeedin, oonan fahamsaneyn ayaa ah. Xumaan ma imaado. Xumaan kalane maka dawa imaado. Ilaa xumaantii hore ay caado inoo noqoto.

Dhaqan xumadii ay la imaadeen, ayaa caado inoo noqoneysa. Malala yaabaayo. Markaas kadib waxaa jiri doonin dad dhaqan xumadaas ka hadla.

Dadkii ayaa caado ka dhiganayaan. Anagoon fahamsaneyn dhaqan xumadaas waxay ka mid noqoneysaa, nolol maalmeedkeena. Waxay noqoneysaa, waxaan maalin walbo aragno. Xumaantii ayaa caado inoo noqotay. Cidna uma aragta inay xumaan tahay.

Markaas kadib ayeey xumaan kale ina dhex keenaan. Tii ayaa hadane la marsiiyaa isla wadadii un. Waxaa la sugaa ilaa ay dadka la qabsadaan xumaantaas. Markii ay la qabsadaan kadib, waxaa dhamaanaya dadka arintaan ka hadla inay xumaan tahay. Tani ayaa caado noqoneysa.

Dadkii iyagoo xumaantan la yaaban, ayaa hadane la kor keenaa xumaan kale. Xumaantii intay ku mashquulsan yihiin. Ayaa xumaantii ka horeysay waxay awood u heleysaa inay dadka ku faafto.

❖

**Tusaale ahaan:**
Wadamo badan waxaa la geeyay dhaqan xumada ah qowmu luudka. Dadkii intii ay tan ka doodaayeen, ay kasii hadlayeen, iyagoo arinkaan diidan.

Ayaa waxay bilaabeen, inay caruurta school lada ka baraan arintaan. Caruurtii ayeey ku dhiiro geliyaan inay qowmu luud noqdaan. Waalidkii ayaa caroonaya.

Dadka oo dhan wey ka mashquulayaan xumaantii aheyd qowmu luudka. Dadka ayaa hada u arka caruurtooda inay halis ku jirto. Bulshada oo dhan ayaa ku mashquuleysa inay caruurtooda ka badbaadiyaan arintaan qowmu luudka ah.

Ma u jeedaa waxa halkaan ka dhacaya?

Xumaantii qowmu luudka aheyd ayaa dadkii la dhex keenay. Dadkii ayaa ka soo horjeystay. Kadib ayaa caruurtooda arintaas lala hor tagay. Oo macalimiintii ayaa caruurta dhaqan xumadaan ka bareysa iskoolada.

Dadkii ayaa hada gudo galaya inay caruurtooda ka badbaadistaan xumaantaan.

Markii horeba qorshaha laga lahaa ayaa aheyd, in la dhex keeno qowmu luud. Dadkii ayaa diidi lahaay. Si taas looga hortago ayaa loo fikiray dhibaato ka weyn.

Dadkii oo dhan ayaa ku mashquulaya dhibaatada ka weyn. Dadka intay ku mashquulsan yihiin caruurta.

Waxaa bulshada ku faafeysa qowmu luudka. Oo lama arki doono qof qowmu luudka ka hadla. Ileen dadka oo dhan ayaa ku mashquulsan say caruurtooda uga badbaadsan lahaayeen arinkaan.

Masiibo ayeey ka dawa keenaan masiibo kale. Si masiibadaan kale ay u qariso masiibadii hore. Dadkii ayaa ku qancaya masiibadii hore, iyagoo la dagaalamaya masiibada dambe.

Qorshahaan ayeey dhinac walba u isticmaalaan.
Halkii ay dadka ka caroon lahaayeen qowmu luudka ay kasoo hor jeesan lahaayeen. Dadkii ayaa wada dhahaayo. ''qowmu luudka ha noo dambeeyo, caruurtaan sidee ugu difaacan karnaa fool xumadaan''.

Taasi oo awood u siineysa dadkii owalba arinkaan keenay. Dadka qorshahaan la imaaday, ayaa ku qancaya tani.

Ileen laba masiibo ayeey iska dawa keeneen. Laba daran mid dooro waaye. Labadaba adiga ayeey halis kuu yihiin. Laakin waxaa lagaaga dhigayaa inay mid adiga kuu fiican tahay.

Oo dadka ayaa wada dhahaayo, arintaan xaga iska dhig. Tan caruurta aan galno. Laba dhibaato idiin dhex taalay ayaad kala doorateen.
Waxaad ku qanacday mid inaad ku sabartid, ood xaga iska dhigtid, oodan ka hadlin. Adigoo u socda inaad masiibada tan kasii weyn xalisid.

Qorshahoodii koobaad ayaa ahaa inay qowmu luudka dadka dhex keenaan. Si aysan dadka ugu mashquulin ayaa caruurtoodii loo tagay.

Ilmaha inta laga difaacanaayo, ayeey arintii qowmu luudka aheyd bulshada ku faafeysaa.

Somalia xitaa qorshahaan mar walba ayaa loo isticmaalaa. Dhibaato xun ayaa leydiin dhex keenayaa, inta aadan taas xalinin, mid kasii weyn ayaa imaaneysa.

Dadkii ayaa ku wada mashquulaya say dhibaatadaan weyn iskaga difaacaan, iyagoo la dagaalamaaya hal dhibaato un. Dhibaatadii hore ayeey ku qancayaan. Oo wey ka aamusayaan. Cid ka hadleysa ayaanan la arki doonin.

Taasi oo iyaga u ah farxad. Ileen qorshihii ay la haayeen ayeey ku guuleysteen.

Ha u maleynin wax walba oo dhacaayo inay iska dhacayaan. Dad baa ka dambeeya. Qorshe ayaa laga leeyahay.

Waa sax. Ilaahay swt ayaa wax walba horey u qoray. Wuxuusan Alle doonin maka dhacayaan dunida. Laakin waxaa jirto awood oo Ilaahay swt Bani Aadamka siiyay. Taasoo ah doorashada. Wax baan kala dooran karnaa. Waxna waan diidi karnaa.

Qowm kale ayaa dadkaaga, dalkaaga iyo diintaada kusoo duulay. Waxaa qasab inagu ah inaan iska difaacno.

Qaabkaan iskaga difaaci karno ayaa ah. Marka hore inaan barano meelaha ay naga soo weeraraan.
Markaan taa ogaano kadib ayaan iska difaaci karnaa.

Masiibo ayeey masiibo kale dul saaraan. Anagoo mid ka cabaadeyna ayeey masiibo kale taa ka weyn keenaan.

Taasi oo keeneysa inaan isha ku qabano un masiibadii dambeysay. Taasi xalkeeda ayaan galnaa. Iyagoo awood u helaya, in masiibadii hore ay dhaqankeena ka mid noqoto.

Ileen dadkii ayaa laga mashquuliyay masiibadaan, tu kale oo ka weyn ayaa lagu mashquuliyay. Tan weyn xalkeeda ayaan u wada cararnay. Anagoo iloobeyna masiibadii hore ee nala dhax keenay.

Dundida ayaa maanta sidaan u shaqeysa. Dhan walba ayeey qorshahaan u isticmaalaan.

Dharka xun. Dharka qaawan. Dharka dumarka iyo kuwa raga oo leysku ekeesiiyo. Qowmu luudka. Is cadeyska. Qabiilka. Furiinka badan. Baraha bulshada. Filimaanta.

Xumaan walba ay doonayaan inay dalkeena ku abuuraan. Laba xumaan ayeey is raacsiiyaan.

1. Mid weyn.
2. Mid kasii weyn.

Dadkii ayaa dhibaatooyinkaas kala dooranaayo. Dadka ayaa xalinaya dhibaatada kasii weyn. Iyagoo meel iska dhigaya dhibaatada weyn. Iyagoo damacsan inay dhibaatadaas weyn mar kale xalin doonaan. Marka ay xaliyaan masiibadaan kasii weyn xalkeeda.

Masiibadaan kasii weyn markii leys dhaho waan xalinay. Waa Ilaahay mahadii. Iyagoo u gudbin masiibadii hore inay xaliyaan.

Ayaa hadane la dhex keenaa laba masiibo kale. Mid weyn iyo tu kasii weyn.

Masiibadii hore, deen ayeey ku tahay. Meel bey u taalaa. Taasi wali lama xalinin. Inta aysan xalinin, inta aysan waqti u helin. Waqti ay ku xaliyaan masiibadii hore.

Waxaa la dhex keenayaa laba masiibo cusub, oo hadane kala weyn. Dadkii ayaa hadane kala dooranaya.
Hal masiibo xalkeeda ayeey galayaan. Iyagoo iloobaya marna meel iska dhigaya, masiibadii hore.

Taasi oo iyaga awood ku siineysa. Inay masiibadii hore dadka ku dhex faaftay. Iyadoon la xalinin.

Arinkaan waa inaan si fiican u fahamnaa. Dhinac walba ayeey u isticmaalaan. Dadka ayaa isku isticmaalo say isku dhibaateeyaan.
Hadii aad qaabkaan fahamtid, dhibaatooyin badan oo noloshaada ka mid ah ayaad xalin doontaa. Kuwa kalane waad iska difaaci doontaa. Dad badan oo dhibaato kugu hayeen ayaad kala baran doontaa.

❖

Hadaan si fudud u sharxo.
2 masiibo ayeey dadka dhex keenaan. Masiibooyinka nambaro ayaan siineynaa.

- **Masiibada 1.**
- **Masiibada 2.**

Dadkaan qorshahooda ayaa ah inay masiibada 1 dadka ku faafiyaan. Laakin waxay ogyihiin dadka inaysan arinkaa marna ogolaaneynin.

Markaas ayeey ku fikiraan. Qaab ay dadka ku ogoleysiin karaan masiibada 1.
Waxay dadka u keenaan, ay bulshada la dul imaadaan masiibada 1 aad. Masiibada 1 ayeey bulshada ku faafiyaan. Iyagoo damacsan masiibadaan 1 inay dhaqan noqoto.

Waxay ogyihiin ayaa ah dadka inaysan ogolaaneynin masiibada 1.
Markaas kadib ayeey waxay sameeyaan. Inay masiibada 2 dadka dhax keenaan.

Masiibo walba ayaa kasii weyn tan ka dambeysa.
Dadkii ayaa ka caroonayay masiibada 1. Markii ay dadka arkaan masiibada 2. Dadkii ayaa ka aamusaya masiibada 1. iyagoo is dhahaya. ’’Alla tan ayaa kasii weyn tii hore’’.

Masiibadii 2 xalkeeda ayeey galayaan dadka. Dadkii ayaa arintaas ku guuleysanaya. Ama masiibadii 2 ayaa kala yaraaneysa. Iyagoo is dhahayaan. AlxamduLilaah. Ilaahay ayaa inoo fududeeyay masiibada 2 inaan ka guuleysano.

Dadkii oo doonayaan inay hada xaliyaan masiibadii 1. Masiibadii 1 inta aysan xalinin. Ayaa hadane la dhex keenayaa.

- Masiibada 3.
- Masiibada 4.

Shacabka ayaa gacanta madaxa saaranaya. Subxaanallaah. Labadaan masiibo cusub ayaa kasii daran masiibooyinkii 1 iyo 2 kala ahaa.
Masiibada 1 xalkeeda meel buu u yaalaa. Iyaga wali taa ma xalinin. Masiibada 3 iyo 4 ayaa la dhex keenay.

Dadkii ayaa argagaxaya. Masiibada 3 iyo 4 ayeey la yaaban yihiin. Markaasay dhahayaan. Masiibada 1 meel hainoo taalo. Taas waa laga daran yahay. Wax ka daran ayaa imaadeen. Oo ah masiibada 3 iyo 4.

Dadkii ayaa hadane kala dooranaya. Masiibada 4 ayaa kasii daran tan 3. Shacabka ayaa gudo galaayaan say ku xalin lahaayeen masiibada 4. Iyagoo meel iska dhigaya masiibada 3.

Waxay dhahayaan masiibada 4 ayaa kasii halis badan masiibada 3. Taasi oo keeneysa inay masiibada 3 meel iska dhigaan.

Markay ku guuleystaan inay xaliyaan masiibada 4. Inta aysan waqti u helin. Waqti ay ku xaliyaan masiibada 3. Waxaa hadane la dhex keenaya.

Masiibada 5.
Masiibada 6.

Waa musalsal. Musalsal iyo game waaye. Game ay dadka ku ciyaarayaan waaye.
Dadkaan hada waxaa keyd u ah wali. Masiibada 1 iyo masiibada 3 inay xaliyaan.

Waqti ay ku xaliyaan lama siinin. Oo masiibada 5 iyo 6 ayaa la dul keenay.

Taasi oo hadane keeneysa dadka inay xaliyaan masiibada 6. Iyagoo iloobaya masiibada 5.
Waad u jeedaa. Waa qorshe. Waa game ay dadka ku ciyaarayaan. Wax walba ay sameynayaan ayeey qorshahaan ku sameeyaan.

Dadka ayeey arinkaan ku waalaan. Shacabka ayeey sidaan gacanta ugu dhigaan. Shacabka ayaa mar walba ah dad wax la dul keeno. Iyagaa mar walba dhibaato un xaliya.

Dowladahaan qorshahooda ayaa ah inay helaan dad ay u taliyaan.
Dadkii ayaa xumaanta lagu faafinayaa. Dadkii ayeey diinta ka tirayaan. Dadka ayeey ka fogeynayaan diin, caqli, maskax, dhaqan iyo qoys.

Shey walba oo qofka Bani Aadam ka ah celinayay. Oo xuduud u yeelayay ayeey noloshooda ka saarayaan. Iyagoo ka damacsan inay helaan dad ay hogaamiyaan.

Qofka markaad rabtid inaad maskaxda ka qabsatid, waa inaadan siinin fursad uu ku fikiro. Maskaxda shacabka ayeey waalayaan. Say gacanta ugu dhigaan. Say dadka ugu taliyaan.

Dadkaan ayaa mar walba qorshahaan isticmaala. Qorshaha masiibada ah. Masiibo jirto ayeey tu kale ka weyn dul keenaan. Masiibadii ayeey dadka xalinayaan.

Waa qaabkaan sidey dadka xumaanta ugu faafiyaan. Dhan walba ayeey tan u isticmaalaan.
Dadkaan ayaa marna ka daalin inay doonayaan inay shacabka u taliyaan.

Waa dad doonaya maskaxda dunida inay iyaga noqdaan. Waxay rabaan ayaa ah inay helaan dad ay u taliyaan. Dad shaqeeya ayeey rabaan. Dad fikiraya ma rabaan.
Waa dad doonaya wixii ay amraan in lagu dhaqaaqo.

Waa qorshe weyn ay dunida ka leeyihiin. Qorshe ay dunida ku maamulayaan.
Arinkaan oo masiibooyinka ah, ayaa iyaga ka caawiya inay dadka ku faafiyaan wixii ay doonaan.

Shacabka ayaa mar walba wax yaalo badan la dhex keenaa. Badanaa wax yaalahaas ayaa aheyn kuwo shacabka faaido ugu jirin.

Sharciyada ay shacabka u dagayaan waa sharciyo faaido u ah kuwii dagsaday un. Shacabka marna dan uma ahan.

Dadkaan ayaa doonayaan maamul. Dunidaan inay maamulaan ayeey rabaan. Waxay arkeen lacagta inay awood tahay. Shey walba ayeey lacag ka sameeyaan. Intaas oo nooc ayeey ku fikiraan, say shacabka lacag la’aan uga dhigi lahaayeen.

Ileen wax baa la ogyahay. Kaasoo ah, qofka lacagta heysto inuu yahay xor. Oo xabsi ma kugu jiro, mana adoonsan kartid.

Hadii aad isku waashid wuu kaa tagayaa. Dantiisa ayuu raacanayaa. Ileen baahi kuuma qabo. Cuntadiisa, reerkiisa iyo biilkiisa asagaa ka adag. Waxaad ku gumeysatid ayaa meesha yaalin.

Qaabab badan ayeey ku fikiraan ay dadka ku gumeystaan.

Qaabkaan hore usoo sheegnay oo ahaa masiibada. Masiibooyinka ay iska dawa keenayaan. Iyagoo ka damacsan dadka inay xumaan ku faafiyaan. Iyagoo isla mar kaasna doonaya inay dadka iska mashquuliyaan.

Dadka ayaa dhexdooda leysku mashquulinayaa. Masiibooyin, dhaqan xumo iyo dhibaatooyin ayaa dhexdooda lagu furaa. Shacabkii ayaa mar walba dhibaato un xaliya, ka dooda, ka cawaada.
Iyaga waa tey rabaan.

Dhibaatooyin badan markii ay adiga kugu furaan. Adigaa naftaada dagaal ku haya. Oo uma heleysid awood aad wax kale kaga fikirtid.

Dhibaatooyinka hadii leyskaaga dawa keeno, waxay sababtaa inaad waali u dhawaatid, oo maskaxdaada ayaa nasan karin. Cabsi, argagax, madax xanuun, fikir, walwal iyo fiiganaan ayeey qalbigaada ku abuurtaa.
Taasi oo keeneyso inaad adiga naftaada iyo bulshadaada un ku mashquushid. Adigoon u heleynin awood aad iyaga ugu mashquushid.

Adigaaba taada kuu jaran tahay. Aduunka dhibaatadiisa inaad ka fikirtid waqti uma heleysid. Waxna makaa gelin. Waayo ileen adiga ayaaba masiibo ku heysataa. Adigaaba mashaqo kuu jaran tahay. Adiga ayaaba dhibaatooyinkaada xalkooda la daala dhacaya.

Qaabkaan masiibooyinka ah iska ilaali. Dad badan ayaa isku isticmaala. Qoys yada ayaa isku isticmaala. Saaxiibada. Dadka is qaba. Raga ayaa arintaan badanaa xaaskooda u isticmaala.

Waa qaab ay dadka gacanta ugu dhigayaan. Qofkii ayaa dhibaatooyin badan lagu furayaa. Qorshaha laga damacsan yahay ayaa ah qofkaan inuusan fahmin.
Qofkii ayaa maalin walba dhibaato cusub la dhex keenayaa. Mar walba aad damacdid inaad ka hadashid dhibaato, ama aad doontid inaad wada hadal yeelataan. Adigoo doonaya in dhibaatada idiin dhex taalo xal loo helo.

Qofkii ayaa kaa waaleynin, wuxuu ku dhahayaa. ’’waa caadi, waan wada hadleynaa’’. Adiga inta aadan ka hadlin dhibaatadii ku heysatay. Qofkii ayaa hadalka kaaga hormaraya. Wuxuu kuu sheegayaa dhibaato ka weyn. Oo duumo ka weyn ayuu kuusoo dejinayaa.

Adigaa dib u guranaya. Dhibaatadii hore ayaad iloobeysaa, dhibaatada cusub xalkeeda ayaad ka fikireysa. Inta aadan tan xalinin, ayaa hadane dhibaato kale laguu sheegayaa.

Dad baa arintaan ka dambeeya. Qorshaha laga damacsan yahay ayaa ah, in adiga maskaxda lagaa waalo. Qof baa doonaya inuu kuu taliyo. Inuu ku amro. Inuu ku maamulo.

Qof baa doonaya inuu gacanta ku dhigo maskaxdaada. Furaha noloshaada inoo helo ayuu doonayaa.

Midna ogoow. Qof haduu mar furahaas kaa soo doonto. Kheyr ma wado. Shar wade waaye ee ka fogoow. Noloshaada ka saar. Intaad iska ilaalin kartid iska ilaali.

Hadii ay jiraan dad badan oo noloshaada ka mid ah. Dadkaan oo dhibaato un sababa. Murug. Dhibaato. Duumo.
Wax xal u baahan un ayeey kula wadaagaan. Ay noloshaada kusoo ziyaadiyaan.

Go'aan adag inaad qaadatid ayaad u baahnaan doontaa. Waxaad mudan tahay inaad ka fikirtid dadkaas. Ma mudan yihiin inay noloshaada kasii mid ahaadaan?
Mise dhibaato un ayeey kugu soo ziyaadiyaan?

Waa dad xun. Hadii aad aragtid qof doonaya inuu kuu taliyo, iska ilaali qofkaas. Wax walba uu doonayo hadii aad u sameyso oona siiyo. Marna ma qancaayo. Waligiis ma qancaayo. Ilaa uu god kugu hubsado makaa haraayo. Iska ilaali noocaan.

Somalida badankooda guryahooda dabkaan aya ka shidan. Mid baa atoore u ah. Mid baa doonayo inuu wax walba iyo qof walba uu gacantiisa ku jiro. Qof baa doonayo inuu kuu taliyo.

Reero badan ayaa sidaan ku burburay.
Arintaan ayaa ah mid badan oo sababta furitaanka, in gurigaas lagu kala tago.
Cidey doontaba ha noqoto. Mararka qaarkii dumar ayaa arintaan isticmaali kara, marna raga.

Cidey yihiin ba. Hadaad mar aragtid qof doonaya inuu ku maamulo oo kuu taliyo. Noloshaada ka saar sida ugu dhaqsiyaha badan. Hadii kale dhibaatada uu kuu geysto, cimrigaaga maka soo kabsan doontid.

Waa dad masiibo un wata. Masiibo ayeey abuuraan. Masiibo kasii weyn ayeey kula dul imaadaan. Iyagoo donaya inaad ku qanacdid ay caado kuu noqoto masiibadii hore.

Haduusan qof ka xishoonin inuu kusoo weeraro. Haka xishoonin inaad is difaacdid.

❖

Wax walbo waxaa lagu magacaabay horumar. Dunida wey hor martay ayeey dhahaan. Ma la soconaa hor markaas waxa uu yahay?
Ma aragnaa u jeedada laga leeyahay hor marka?

Maxay hor mar ka iyo dhaqan xumada isku ag dhigaan? Ay ka dhigaan, sidii inay dhaqan xumada hor mar tahay oo kale.

Sababta ayaa ah, Bani Aadam ka wuxuu mar walba doonayaa in la faaniyo. Inuu shey wax fiican ka maqlo.
Dadka ayaa isku dawa deysta. Umada oo dhan ayaa shey wada sameeneysa, markaas oo qof walba sameynayaa. Asagoon is weydiinin sheygaan inuu fiican yahay iyo in kale.

Hor marka waa shey wanaagsan. Marna mala diidin inaan hor marno. Laakin sababta ay dhaqan xumada hor mar ugu dhigayaan ayaan la yaabnay.

Dhaqan xumo badan ayeey mar walbo dunida keenaan. Dhaqan xumadaas ayaa mararka qaarkii noqon karta. Falal ay ku kaceen umadihii inaga horeeyay. Taasi oo ku sababtay qaar ka mid ah in la halaago.

Maanta waan u jeednaa dunida waxa ka socdo. Qof wax loo sheegaayo ayaaba jirin. shey walba ay soo saaraan. Waxay dawa raacsiiyaan arin kale oo dhaqan xumo ah.

Shey walba ay bulshada kusoo ziyaadiyaan, waxay la soo saaraan sheygaas dhaqan xumo cusub uu asaga wato.

Dunidaan halka ay la doonayaan ayaan la yaaban nahay. Ileen Muslimiin ahaan waxaan waan u jeednaa. Dadkii ayaa loo sii diyaarinayaa Dajaal.

Sheydaanka qorshihiisa ayuu ku dhaqaaqayaaa. Nasiib xumo waan u jeednaa inuu mar ba marka ka dambeysa in badan oo Bani Aadam ah inaga wadanayo.

Sheydaanka uma kala baxsana. Bani Aadam oo dhan ayuu necban yahay. Asaga waxba kama galin. Qorshihiisa un ayaa ah inuu dad badan naarta u wato. Ilaahay hanaga badbaadiyo.

Sheydaankaan ayaa mar walba Bani Aadamka cadow ku ahaay. Oo waligiisa ayuu ina dawa socon jiray.

Sheydaanka hadii aad Ilaahay ka magan gashid, wuu kaa tagayaa. Laakin maanta waxaan u jeednaa sheydaanul insi inay badanayaan.

Dad badan oo sheydaanka shaqadiisa u qabanayo. Dadkii ayeey ku faafinayaan xumaanta. Ha noqoto inay dadka diinta ka fogeeyaan ama inay dadka ka wada dhigaan cawaano, oo wixii la amro un ku dhaqaaqa.

Waad u jeedaa dadka maanta dunida ku nool meel un in laga amro. Ha noqoto inay ku xeran yihiin mid fanaan ah, jilaa, youtuber. Qof un ayeey ku xeran yihiin.

Dadkaan ayaa kaaga dhigaya, sidii inaad doorasho leedahay oo kale. Intaas oo qof ayeey maal geliyaan, dadkaas ayeey ka dhigaan kuwo caan ah oo lagu dayado. Markaas kadib shacabka ayeey ku faafiyaan dhaqan xumada.

Dadkaan ayaa mar walba qorshahooda u fulayaa. Hadii aad fiiro gaar ah u yeelatid. Dadka caanka ah badanaa hal shey ayeey wada xayeeysiiyaan.

Dadka wax xayeysiinaayo, oo bulshada la hor keenaayo ayaa kala duwan. Laakin qorshihii waa isku mid kii. Dadka oo dhan hal meel ayeey u wada wadaan.

Dad kala duwan ayeey shaqo gelinayaan, say dadkaas qorshahooda ugu fuliyaan. Dadkaas ayaa mar walba kala duwan. Dunida daaraheeda ayeey ka kala imaadeen.

Laakin ma is weydiisay sababta keentay, dadkaan dunida meel walba ay ka joogaan inay isla dhaqan xumadii un umada ku faafinayaan.

Dadkaan ayaa umada u xayeysiiya, dadka ayeey wax wanaagsan uga dhigaan in dharka la tuurto, xornimo, qowmu luud, xumaantii oo horu mar lagu magaacabo, dadka ay diinta ka fogeynayaan, dhaqan xumo marna malahan. Xishmad iyo nidaam iska iloow.

Waxay dadka ka gadayaan ayaa badanaa isku mid ah. Dadka wax xayeysiinaayo un ayaa kala duwan, laakin sheyga ay xayeysiinayaan ayaa isku mid ah.

Maanta dharka ay horumarka ku magacaabaan. Dad baa xayeysiiya. Ma is weydiisay sababta keentay in dharkaas laga xerto dunida daaraheeda. Dharkaas waxaa laga xertaa qaaradaha ay reer galbeedka dagan yihiin, Asia iyo Africa. Isla dharkii un.

Dharka ayaan tusaale ahaan usoo qaatay. Laakin shey walba waa isku mid. Heesaha dunida laga dhageytso waa isku mid. filimaanta, meel walba ayaa laga fiirsadaa.

Dadkaan ayaa u isticmaala umada inay dhan walba kasoo galaan. Maalin ba maalinta ka dambeysa shey cusub ayeey inoo soo saaraan. Anagaa la yaabna mararka qaarkii dunida halkay u socoto.

Xumaanta ayeey bulshooyinka dunida ku nool oo dhan ku faafinayaan.

Magac hor mar iyagoo isticmaalaayo ayeey dunida ku faafiyeen dhaqan xumada.
Waxaan la yaabanahay dhaqan xumada iyo horumarka waxa isku xeray?

Dadkaan ayaa mar walba ereyo qurxan isticmaala. Oo dadka soo jiidanaayo. Waxay isticmaalaan ereyo kala duwan ay dadka daciif u yihiin. Ereyadaas ayaa isla markiiba qalbiga taabanaya oo dagaya. Iyagana waa tii ay rabeyn.

Waxay ku dhahayaan waa horumar. Ilbaxnimo. Reer magaal. Intaas oo shey ayeey u isticmaalaan say dadka oo dhan gacanta ugu dhigaan.

Waxa leysku dagaalo ayaa ah maskaxdaada. Kii maamuli lahaa ayeey dagaalka ka taagan tahay. Mala maamuli doonaa maskaxdaan? Su'aasha ma ahan.

Wey qorsheysteen inay umada oo dhan maamulaan. Dadka oo dhan in gacanta ay ku dhigaan mar hore ayeey qorsheysteen.